

Warqad faahfaahin ah oo ku saabsan *Småsteg* (Talaabo yar)

Ku socota qoysaska!

Waa wakhti muhiim ah xiligu ilmahu weli gaadhin iskuulka ee laakiin uu udiyar garoobayo. Waxaanu ka caawin karnaa ilmahaaga inuu diyaar u noqdo bilowga iskuulka. Wax barashadu kuma saabsana xarfo iyo tiro oo qudha. Waa in la barto sidii wax loo baranayeey iyo sidii dadka kale lola dhaqmi lahaa. Waxaanu ku isticmaaleynaa xanaanadan ciyaalka (barnehagen) *Småsteg (Talaabo yar)* oo ah talaabo yar hore u qaad. Sidey u baran lahaayeen xirfadahan muhiimka ah.

Wax qabadka *Småsteg* waxay ka baranayaan ilmahu 4tan mawduuc:

1. **Xirfadaha sida wax loo barto:** Ilmahu waxey baranayaan xirfado ka caawinaya waxbarashooda. Waxay ku sii ficnaanayaan sidii ay niyada wax uga soo jeedin lahayeen, siday wax udheegeysan lahayeen iyo sida markey caawin uu baahan yihiin uu waydiisan lahayeen.
2. **Shucuurta iyo damqasho:** Ilmahu waxay baranayaan siday u fahmaan shucuurta ay dareemayaan iyo shucuurta dadka kale. Waxay baranayaan sidey daryeel ugu muujin karaan dadka kale.
3. **Inaad ka adkaato shucuurta:** Ilmahu waxay baranayaan siday isku dejin karaan markay shucuurto kacsantahay, sida markay werwerayaan ama xanaaqaan.
4. **Saxiib ama dhibaato xalin:** Ilmahu waxay baranayaan sida asaxaab lo helo iyo sida loo dhawro saaxiibtinimada iyo habka fiican ee loo xaliyo dhibaata.

Sannadkan ilmahaagu wuxuu baranayaa wax badan. Markaa caawitaan buu kaaga baahanyahay. Sannadkan gudihiisa waxaa la soo siin doona warqad la dhaho Foreldrelenke oo ku saabsaan isbuucba mawduucyadiisa *Småsteg*. ``Foreldrelenke`` waxaad ka helaysaa wax qabadyo yar yar oo fudud markaa adiga iyo ilmahu aad wada sameyn kartaan. Wa fursad wanaagsan oo aad kala socon kartid ilmahaaga waxuu barto. Ilmahaaguna wuxuu heleyaa fursad uu ku celcelin karo iyo fursad uu ku helo inuu kutuso waxuu bartay.

Hadii aad wax su`aal ah ama faafaahin ka qabtid *Småsteg*, fadlan nala soo xidhiidh. Waanu kuu mahad celineynaa gargaarka aad ilmahaaga siineysid si uu ubarto xirfadahan ka caawinaya udiyaar garowga iskuulka iyo noloshiisa guud.

Salaan